

Abuurista xalka daryeelka caafimaad wanaagsan, fudud, oo badbaado leh.



Waa maxay HealthInfoNet?

- HealthInfoNet waxa ay maareysaa nidaam kombiyuutar oo ammaan ah oo ay isticmaalaan bulshada ku hawlan daryeelka caafimaadka si ay u wadaagaan xogta caafimaadka iyada oo ay ujeedadu tahay in lagu bixiyo daryeel wanaagsan oo badbaado ah.
- Nidaamku waxa uu xogtaada caafimaad isugu geynayaa hal diiwaan oo danabeysan.
- Adeeg bixiyeyaashu waxa ay horeyba iskuula wadaagayeen diiwaanadaada caafimaad iyagoo isu marinaya fakis, iimayl, iyo boosto. HealthInfoNet waxa ay ka dhigeysaa hababka wadaagga kuwo ka sii fudud, dhakhso badan, oo ka sii ammaan badan iyada oo loo marayo nidaamka kombiyuutarka.



Maxaa ay yihiin faa'iidooyinka?

- HealthInfoNet waxay daryeel-bixiyeyaashaada caafimaad ka gacan siineysaa inay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan sidii ay u gaari lahaayeen go'aanno xog ogaal ah oo ku saabsan daryeelkaaga, gaar ahaan marka ay timaado xaaladaha degdegga ah iyo kala-wareejinta daryeelka.
- Faa'iidooyinka kale waxaa kamid noqon kara khaladaad yar, tijaabooyin yar oo soo noqnoqda, waraaqo shaqo oo yar, kharashyo qiimo jaban, iyo go'aanno daryeel oo wanaagsan.
- Waxbadan ka ogow hinfonet.org/for-patients



Kawaran haddii aanan rabin diiwaanka HealthInfoNet?

Haddii aadan rabin macluumaadkaaga caafimaad in la geliyo diiwaanka HealthInfoNet, waxaad dooran kartaa in aad la wadaagin macluumaadkaaga caafimaad adigoo buuxinaya “foomka ka bixitaanka” kaasoo onlaynka laga helo hinfonet.org/for-patients ama adiga oo kooxda Taageerada Macaamiisha HealthInfoNet ka wacaya 866-592-4352.

Maxaa kudhex jira diiwaankeyga?

- Diiwaankaaga caafimaad waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan daawooyinka lagu qoray, xasaasiyadaha, natiijooyinka baaritaanada, booqashooyinka iyo dukumiintyo, habraacyo, iyo kuwa kale oo badan.
- Waxaa sidoo kale ka mid ah macluumaadka tirakoobka, oo ay ka midka yihiin magacaada, taariikhda dhalashada, ciwaanka goobta, iyo taleefan lambarka.
- Macluumaadka xasaasiga ah waxaa kaliya lagu daraa haddii aad adiga tiraahdo waa caadi, ama marka ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Ma mid sir ah oo ammaan ah baa?

- HealthInfoNet waxa ay qaadeysaa tallaabo kasta oo ay diiwaanadaada uga dhigeysa kuwo sir ah oo ammaan ah.
- Macluumaadka waxaa loo beddelaa qaab aan la akhrin karin waxaana lagu diraa khadadka kombiyuutar gaar ah oo ammaan ah.
- Macluumaad lagugu aqoonsanayo laguma iibin doono ama laguma dari doono wax liisaska boostada ah.
- Kaliya kuwa ku lugta leh daryeelkaaga caafimaad ayaa loo oggol yahay inay galaan diiwaankaaga.